# OGOW SHARCIGA

**Guriyeynta cadaaladda micnaheedu wa dadka oo dhami waxay leeyihiin fursad siman oo loogu tixgaliyo qaybaha kirada iibsashada guryaha ,amaahda guryaha, iyo caymiska guryaha.**

**Ogow sharciyada kaa dhifaacaya tikoorka guriyeynta.**

**MAXALLIGA AH:** Magaalooyin badan ayaa leh hay'ado maxalli ah iyo hay,ado xuquuqul insaanka ah oo mamnuucaya takooridda guryaha. La xiriir hoolka magaaladaada si aad u hesho macluumaad.

**GOBOLKA:** "Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee Iowa" (Iowa Code 216) wuxuu mamnuucayaa takoorka guriyeynta ee ku saleysan jinsiga, midabka, nooca galmada, aqoonsiga jinsiga, diinta, asalka qaran, naafonimo jireed, iyo xaalad qoys (joogitaanka carruurta guriga).

**FEDERAALKA:** Sharciga Xuquuqda Madaniga ee Federaalka ee 1866 wuxuu mamnuucayaa takoorista guryaha sababo la xiriira jinsiga ama midab. Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee 1968, Cinwaanka sideedaad VIII, iyo Xeerka Waxka Beddelka Guryaha ee 1989 ayaa mamnuucaya takoorka guryaha sababtoo ah midab, midab, jinsi, diin, asal qaran, naafonimo, iyo xaalad qoys.

---

Xaaladda qoyska, ama joogitaanka carruurta ee guriga, ayaa ilaalineysa qoysaska haysta carruurta ka yar 18 sano. Sidoo kale waxaa ilaalinaya qoysaska raadinaya haynta cunug ama filaya dhalashada cunug. Waxa kaliya oo cidhiidhi ah ayaa ka reebaya qaybtan sharciga: unugyo loo qoondeeyay "guriyeyn loogu talagalay dadka da'da ah.

Milkiileyaasha guryaha wuxuu sharcigu farayaa inay u oggolaadaan wax ka beddelka macquulka ah ee guriga (taas oo ka imaaneysa kharashka kiraystaha) iyo inay si macquul ah ula qabsadaan qaanunka si ay ula jaan qaadaan baahiyaha dadka naafada ah.

---

HAL-KU-DHIGGA GOBOLKA IOWA:

Xorriyadeenna ayaannu abaal marinnaa oo aan ilaalin doonnaa xuquuqdeenna.

---

## HADAFKEENU WAA GOBOL KA MADAX BANAAN TAKOOR.


**Guddigu wuxuu qaabilaa, baaraa, oo xaliyaa cabashooyinka** ku saabsan takoorka meelaha shaqada, guryaha, hoyga dadweynaha, amaahda, iyo waxbarashada.

**Guddigu wuxuu idin siin karaa dad idin hadlo iyo barnaamijyo** ku saabsan mowduucyada xuquuqda madaniga ah, oo ay ku jiraan guryo caddaalad ah. Qoraallo bilaash ah oo ku saabsan takoorka ayaa la heli karaa markii la codsado.

**Guddigu wuxuu sameyn karaa tijaabinta milkiileyaasha guryaha, ganacsiyada, iyo loo shaqeeyaha** si ay u darsaan nooca iyo baaxadda takoorka ee Iowa, iyo inay go'aamiso in la raacayo sharciyada xuquuqda madaniga ah.

**Nagala soo xiriir 515-281-4121, 800-457-4416, ama icrc@iowa.gov.**

IOWA CIVIL RIGHTS COMMISSION



# GURYO MACQUUL AH.

# OGOOW XUQUUQDAADA.

IOWA CIVIL RIGHTS COMMISSION


**BOOQO** **Dhismaha Xafiiska Gobolka Grimes**
400 East 14th Street
Des Moines, IA 50319

**GUJI** icrc.iowa.gov

**WAC** 515-281-4121
**800-457-4416** (gudaha Iowa oo kaliya)

**EMAIL** icrc@iowa.gov

# XAALADAHAN OO KALE MA KUGU DHACEEN?

- ◯ Waxaad kaheleysaa xayeysiin aqal sifiican uquruxsan oo waxadna waceysa nambarka xayeysiiska. Waxaad ogaaneysa in guriga wali la heli karo isla markaana aad u timaado si shakhsi ah. Markii aad timaaddo, waxaa laguu sheegayaa, “Waan ka xumahay, gurigii uun baa gor dhow la kiraystay.”
- ◯ Markaad raadineyso guri aad iibsato, dhammaan guryaha wakiilka guryaha ayaa ku tusaya inaad ku dhex jirtid xaafad gaar ah oo keliya. Wakiilka sidoo kale wuxuu ku hadlaya hadalo ay ka mid yihiin, “Waxaan dareemayaa aaggan inuu kugu habboon yahay” ama “Waan hubaa inaadan ku faraxsanayn xaafaddaas.
- ◯ Waxaad waceysa guri dabaq ah. Markii aad u sheegto maamulaha in aad guriga adiga iyo ilmahaaga u rabtid, ayay kuugu jawaabaysaa/jawaabaya, “Tani wa guri labo dabaq ah oo leh balakoon. Meel fiican uma ahaan laheyn cunug.”
- ◯ Waxaad codsaneysaa amaah guri si aad u iibsato guri, laakiin bangiga ayaa leh maad buuxinin shuuradhahooda. Ma fahmaysid sababta lagugu diiday amaahda - halka aad dhibaatooyin dhaqaale qaarkood ay horan ku heysatay, hadda waxaad haysataa dakhli kugu filan iyo rikoor fiican oo deyn ah.
- ◯ Waxaad iibsan rabtaa guri waxaadna dooneysaa inaad iibsato caymiska milkiilaha guriga. Laakiin wakiilka caymiska ayaa kuu sheegaya inaysan qorin shurudaha/sharciyada guryaha ku yaal magaalada aad ku nooshahay.
- ◯ Waxaad tahay indhoole oo waxaad leedahay eey hage ah, laakiin maareeyaha guriga kaa kireysan maayo sabab la xiriirta sharciyada guryaha aan ogoleyn xayawaanada
- ◯ Waxaad weydiinaysaa guri dabaq ah kirada ijaarka ah.deebaajiga lagusoo xigtayna way ka badan yihiin lacgat kiraystayaasha kale laga filayo inay bixiyaan.

**Haddii xaaladahan ama wixii lamid ah ay ku soo gaareen, waxaad noqon kartaa dhibbane takoorid xagga guryaha ah.**





# GUDBINTA CABASHO

**La xiriir Komishanka Xuquuqda Madaniga ah ee Iowa si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gudbinta cabashada takoorka guryaha.**

**WAC 515-281-4121** ama **800-457-4416**

**BOOQASHO icrc.iowa.gov**

**Dhismaha Xafiiska Gobolka Grimes**
400 E. 14th Street, Des Moines
8:00 AM to 4:30 PM (Isniin - Jimco)

- Wax lacag ah lagama qaadayo gudbinta cabashada.
- Khabiir ku takhasusay Guryeynta ayaa ku caawin doona, kaa caawin doona go’aaminta haddii aad leedahay sababo aad ku xareyso cabasho, waxayna kaa caawin doontaa inaad buuxiso foomka cabashada.
- Guddigu wuxuu u gudbin doonaa cabashadaada Waaxda Guryeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka Mareykanka (HUD) si loo ilaaliyo xuquuqdaada haddii xaaladda uu daboolayo sharciga federaalka.

---

**Cabashada waa in lagu xereeyaa 300 maalmood gudahood laga bilaabo maalintii dhaqan takoorka lagula kacay mise la sheegayo,adigo raacayo sharciga Iowa.**

Cabashada waxa sidoo kale loo gudbin karaa Waaxda Guryeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka Mareykanka,hal sano gudahood ama waxaa loo xajin karaa talaabo maxkamadeed oo gaar ah laba sano gudahood.

# CABASHO AYAAN GUDBIYAY. HADDA MAXA XIGA?

1. **Cabasho ayaa la xareeyaa markii ay komishanku helaan.**
2. **Ogeysiiska ashtakada** waxaa loo diri doonaa qofka ama shirkadda ay dacwada ka gudbiyeen, waxaana la siin doonaa fursad ay kaga soo jawaabaan.
3. **Baaraha waxaa loo xilsaarayaa inuu sameeyo baaritaan dhexdhexaad ah oo dhameystiran.** Markhaatiyaasha waa lala xiriirayaa waana la baarayaa diiwaanada la xiriira. Dhinacyada waxaa sidoo kale la siin karaa fursad ay kaga wada hadlaan heshiis iskaa wax u qabso ah, oo aan cilad lahayn.
4. **Garsooraha sharciga maamulka ayaa go’aamin doona** inay jirto sabab macquul ah oo lagu aamino in takoorku dhacay.
5. **Sababta suurtogalka ah ayaa jirta haddii ay jiraan sababo macquul ah** oo lagu rumaysan karo in takoorid ay dhacday. Haddii aan la helin sabab macquul ah, cabashada waa la diidey, iyadoo la raacayo xuquuqda rafcaanka.
6. **Marka la helo sababi macquul ah kadib,** dhinacyadu waxay dooran karaan in khilaafka lagu xalliyo maxkamadda degmada, ama dhegeysiga dadweynaha ee Guddiga hortiisa.